
# Aqoonsiga ardyada dugsiga ka maqan iyo taageeridda u kala gudbidda waxbarashada

Xirmo

3




## Buugga Ka-qayb-galayaashada

Waxaa loo diyaariyey:
Puntland Disability Organizations Network (PDON), Somalia
Disability Aid Foundation (DAF), Somalia
Adventist Development and Relief Agency (ADRA), Somalia
Save the Children, Somalia
Norwegian Association of Disabled

Waxaa diyaarisay:
Enabling Education Network, March 2022

[Sharraxaada muuqaalka: Dhinaca bidix ee muuqaalka dambe waa dugsi oo ay joogaan laba gabdhood oo dharka dugsiga xiran oo taagan dugsiga hortiisa iyo mid ama laba shaqaalaha dugsiga ah iyo arday dugsiga bannaankiisa jooga. Xagga hore ee midig waxaa jooga saddex gabdhood oo wata baaldiyaal iyo weelal biyood kuwaasoo aan xirnayn dharka dugsiga oo u socda in ay biyo soo dhaamiyaan. Waxay eegayaan dhanka dugsiga].

Buugaan waxaa laga heli karaa creative Common licence attribution. Wixii xog dheeraad ah, booqo: https://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/4.0/legalcode

# Tusmo

Erayo gaaban ........................................................................................ 4

Muxuu yahay buug gacmeedkani yaase loogu talogalay? ................................. 5

1. Waa kuwee ardayda dugsiga ka maqan maxayse tahay sababta ay uga maqan yihiin? ........................................................................................ 6

2. Maxay tahay sababta ay ardaydu dugsiga uga maqan yihiin Soomaaliya? ... 20

3. Waa maxay siyaasad? ........................................................................ 22

4. Istiraatiijiayadaha/xeeladaha iyo xalalka ku saabsan halka ay joogaan iyo aqoonsiga ardayda dugsiyada ka maqan ........................................................ 25

5. Waa maxay ka gudubka heerarka waxbarashadu? ...................................... 28

6. Ka wada qaybgalka ka gudubka heerarka waxbarashadu wuxuu ka bilowdaa guriga ........................................................................................ 32

7. Istiraatiijyadaha/xeeladaha lagu taageerayo ka gudubka heerarka waxbarashada loo dhan yahay ........................................................................ 39

8. Doorka ururada dadka naafada ee aqoonsiga ardayda dugsiga ka maqan iyo taageeridda ka gudubka heerarka waxbarashada ........................................... 44

# Erayo gaaban

| | |
|---|---|
| ADRA | Adventist Development Relief Agency |
| CBO | community-based organisation |
| DAF | Disability Aid Foundation |
| EENET | Enabling Education Network |
| NAD | Norwegian Association of Disabled |
| NGO | non-governmental organisation |
| OPD | Organisation of People with Disabilities |
| PDON | Puntland Disability Organizations Network |
| SEND | special educational needs and/or disability |
| SIT | school inclusion team |
| ToT | training-of-trainers |

# Muxuu yahay buug gacmeedkani yaase loogu talogalay?

Buug gacmeedkani waxaa loogu talogalay ka qaybgalayaasha ururada dadka naafada (OPD) ee xirmada 3 ee waxbarashada loo dhan yahay.

Xirmadani waxay leedahay laba ujeeddo.

1. In la siiyo ururada dadka naafada ah aragti guud ee arrinta la xirriirta ardayda dugsiga ka maqan. Waxay eegaysaa xannibaadaha iyo arrimaha ku xeeran sababta ay qayb ardayda ka mid ahi dugsiga uga maqan yihiin, iyo silisiladda sababaha keena iyo saamaynta ka dhalata in ay noqdaan kuwo dugsiga ka maqan.
2. In kor loo qaado hababka ay dugsiyadu ku xaqiijin karaan ardayda dugsiyada ka maqan, iyo in dhamaan ardayda kale helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay si habsami ah oo wax ku ool ah ugu kala gudbaan marxaladaha dugsiga ama dugsiyada kale.

U kala gudbidda waxbarashada waxaa badanaa lagu qeexaa ardayda dugsiga ka tegaya/baxaya, kuwa imanaya ama kuwa dhowaan waxbarashada yimid.

Tiro badan oo ardayda ahi waxay u wareegaan ama aadaan goobo waxbarasho oo ka baxsan waqtiyada la qorsheeyey. Kuwan waxa ku jira/ka mid ah:

- Arday dugsiga ka maqan kuwaasoo aan weligood xaadirin dugsi ama iskaga tegay
- Arday ay qoysaskoodu guurayaan
- Arday lagu khasbay in ay wareegaan
- Arday aan dugsiga aadi/tegi karin sababo la xirriira isku dhacyo heerarkoodu sarreeyaan oo saamaynaya bulshooyinkooda
- Arday laga saarey/reebay dugsiyadooda.

Ma jiro hal hab/qaab oo loogu dari karo ardayda dugsiga ka maqan ama u kala gudbidda waxbarashada looga dhigi karo mid si buuxda looga wada qaybgalo. Sababtoo ah khibradda arday kasta ee dugsiga ka maqan, dugsiga ka hora ama dugsiyada u dhexeeya way ka duwan tahay kuwa kale. Sidaa darteed, dugsi kasta iyo bulshada ku xeeran waxaa loo baahan yahay in ay debecsanaadaan. Waxay u baahan karaan in ay siyaabo kala duwan ugu jawaabaan kooxo arday ah oo kala duwan ayna horumariyaan xalal ku haboon xaaladaha deegaankooda.

# 1. Waa kuwee ardayda dugsiga ka maqan maxayse tahay sababta ay uga maqan yihiin?

Tababaradii hore waxaynu soo aragnay xannibaadaha waxbarashada loo dhan yahay. Xannibaadaha waxbarashada loo dhan yahay waa xannibaadaha saameeya ardayga **joogitaankiisa** dugsiga, **ka qaybgalkooda** hannaanka waxbarashada, iyo **guul gaarkooda**. Xannibaadahan waxa ka mid ahaa:

- **Caqabadaha la xirriira jawiga/deegaanka**
- **Caqabadaha la xirriira agabyada**
- **Caqabadaha la xirriira habdhaqanka**
- **Caqabadaha la xirriira siyaasadda**
- **Caqabadaha la xirriira dhaqangelinta.**

Tababarka xirmadani waxaynu gaar ahaan eegaynaa **xannibaadaha sababa in ardaydu ay dugsiga ka maqnaadaan**—in kastoo xaqiiqo ahaan in badan oo iyaga(xannibaadaha) ka mid ah ay la mid yihiin xannibaadaha ka qaybgalka.

## a) Koox xannibaado ah oo ardayda ka horjoogsada waxbarashada


### Deegaanka iyo agabyada

Meesha uu arday ku nool yahay waxay saamayn kartaa in uu/ay dugsiga joogo/joogto iyo in kale. Tusaale, guud ahaan waxaa jira dugsiyo badan oo ay sahlan tahay helitaanka dugsiyada dhanka magaalooyinka marka loo barbardhigo meelaha miyiga. Meelaha fog fog ee miyaga, masaafada iyo waddooyin fiican oo aan jirin waxay ka dhigi karaan mid adag ama aan suurtogal u ahayn qayb ka mid ah ardayda in ay dugsi tagaan.





[Sharraxaadasawirka: sawirku waxa uu tusayaa waddo dheer oo aadda duurka busta/boorka, dhagaxa leh. Waxa ka muuqda koox wiilal ah oo daajinaya riyo waddada agteeda. Meel fog ee dhinaca bidix waxa ku yaala dugsi. Meel fog ee dhinaca midig waa xaafad. Laba cunug oo dharka dugsiga xiran ayaa waxa ay soconayaan waddada dheer.]

Xilliyada abaarta, ardayda, gaar ahaan gabdhaha, dugsiga way ka hari karaan sababtoo ah waxay ku khasban yihiin in ay in badan socdaan si ay biyo ugu soo ururiyaan/dhaamiyaan qoysaskooda.




[Sharraxaadasawirka. Dhanka bidix ee muuqaalka dambe waa dugsi oo ay joogaan laba gabdhooda oo dharka dugsiga xiran oo taagan dugsiga hortiisa iyo mid ama laba shaqaalaha dugsiga ah iyo arday dugsiga bannaankiisa jooga. Xagga hore ee midig waxaa jooga saddex gabdhood oo wata baaldiyaal iyo weelal biyood kuwaasoo aan xirnayn dharka dugsiga oo u socda in ay biyo soo dhaamiyaan. Waxay eegayaan dhanka].

**Agabyada/kheyraadka,** oo ay ku jiraan **dhaqaalaha, agabka iyo kheyraadka dadku** waxay saameyn ku yeelan karaan in ardaydu ay dugsiga joogaan iyo in kale. Qayb ka mid ah waalidiintu ma awoodaan in ay carruurtooda dugsiga u diraan. Qoysaska danyarta ahi waxay ku tiirsanaaan karaan shaqada carruurtooda si ay u noolaadaan. Dugsiga meelaha danyarta ku yaal waxay la halgami karaan in ay helaan agabyada waxbarista iyo waxbarashada iyo fasallo ku filan. Maqnaanshaha macallimiin tababaran waa **arrin kheyraadka dadka la xirriirta** taasoo saamaysa in ardaydu waxbarasho helaan.



[Sharraxaadasawirka: fasal buuxa oo ay joogaan arday badan oo safaf isku dhowdhow u fadhiya. Macallin ayaa la arki karaa masaafada xagga hore oo tilmaamaya wax sabuuradda ku qoran. Darbiyada fasalka iyo daaqaduhu waa kuwo xaalad dayactir la'aan ah ka muuqato.]

## Habdhaqanada iyo aaminaaadaha/rumaysnaanta

Habdhaqanka qoysaska, bulshooyinka iyo bulshooyinku ayaa noqon karta arrin weyn ee keenta in ardaydu dugsiga ka maqnaadaan. Tusaale ahaan, qaybo qoysaska iyo bulshooyinka ka mid ah waxay aaminsan yihiin in ardayda naafada ahi aysan dugsiga joogi karin.  Bulshooyin kale, qoysasku waxay dareemi karaan in gabdhuhu guriga iska joogaan aysana xaadirin dugsi. Waalidiinta/daryeelayaasha aan iyaga qudhoodu dugsi soo dhigan waxay u arki karaan mid aan qiimo laheyn in ay carruurtooda dugsi u diraan. Inta badan waxaa keena aqoon ama faham la'aan iyo cabsi taasoo horseeda habdhaqamo taban (xun).



[Sharraxaadasawirka:  nin ayaa fahdiya miiska ciyaarta hortiisa oo miis yar dul saaran. Wiil yar oo dharka dugsiga xiran ayaa wuxuu haystaa waraaqo ay dushooda wax ku qoran yihiin isagoo u soo taagay xagga ninka. Ninku waa ka sii jeedaa gacantiisa ayuuna kor u taagayaa. Wejigiisa caro ayaa ka muuqata.]

## Siyaasadaha iyo dhaqangelinada

Siyaasadaha dugsiga, deegaanka iyo qaranku waxay dhibaatada ku sii kordhin karaan ardayda dugsiyada ka maqan. Tusaale ahaan, haddii dal uusan lahayn siyaasad dugsiyada ka ilaalisa takoor ka dhan ah qayb ardayda ah, tusaale ahaan, gabdhaha uurka leh, ardaydan waa la takoori karaa/laga reebi karaa. Dhaqangelinada waxbarista iyo waxbarashadu, waxay saameeyaan khibrada ardayda ee dugsiga. Qayb ardayda ahi waxay doortaan in aysan dugsiga aadin sababtoo ah ma farxasana. Dhaqamada waxbarista ee aan si firfircoon uga qaybgalin ardayda aana qiimayn waxa ay ku biirinayaan waxay sababi kartaa in ardaydu ay xiisaha lumiyaan dugsigana isaga tagaan/haraan. Ardaydu waxaa kaloo laga yaabaa in aysan dusgiga imaan iyagoo ka cabsanaya ciqaab jirka ah.



[Sharraxaadasawirka : waxa ka muuqda nin taagan xagga hore ee fasalka oo haysta ul dheer. Wuxuu u egyahay mid caraysan. Wuxuu usha ku tilmaamayaa arday hortiisa taagan. Ardaygu madaxiisa ayuu foorariyey. Fasalka waxa ku jira arday soo eegaysa.  Bannaanka albaabka furan ee fasalka waxa joogga arday iskiis u taagan muuqaalka danbe cadceeda hoosteeda isagoon waxba ka harsanayn.]


## b) Xannibaadaha isku xiran ee saameeya waxbarashada ardayda

in kasta oo ay tahay mid fudud, haddana sabab kaliya carruurtu dugsiyada ugama maqna, waxa badanaa jira arrimo kale oo badan oo kala duwan kuwaasoo dhibaatada wax ku sii dari/biirin kara. Tusaale ahaan, yaraanta macallimiin tababar wanaagsan leh waxay dugsiga ku hogaamin kartaa in uu yeesho macallin yar oo aan si fiican loo tababarin iyo fasallo aad u ballaaran. Tani waxay dhaxalsiisaa waxabarasho tayadeedu liidato. Tani waxay ku keeni kartaa ardayda in ay dugsiga ka haraan sababtoo ah waxba ma baranayaan, sidoo kale waalidiintooda ama daryeelayaashu waxay dareemaan in aysan wax qiimo ah lahayn in ay carruurtooda dugsiga u diraan. Dugsigu wuxuu kaloo aad uga fogaan karaa guriga ardayga taasoo saameysa joogitaankooda.

## Xannibaadaha isku xiran ee saameeya waxbarashada ardayda.




Tiro yar oo macallimiin ah oo tababaran



Macallimiin tiro yar oo tababaran iyo fasalo arday tiro badan



Ardaydu waxa ay helaan waxbarasho tayo hoosaysa




Ardaydu dugsiga waxa ay uga haraan in aysan wax baranayn darteed



Waalidka iyo dadka caruurta haya ma dareensana qiimaha ay leedahay in ay caruurta dugsiyada u diraan

iyo




Dugsigu waxa uu ka fog yahay gurayaha ardayda

[Sharraxaada sawirka: waa lix sawir oo kala gaar ah oo ay isku xiraan fallaaro. Sawirka u horreeya wuxuu tusayaa astaan sawir haweeney, oo haysta ul ay tu tilmaamayso sabuuradda oo ay wax ku qoran yihiin. Waxa ah goobo ballaaran oo cas iyo xariiq cas oo dhex mara sawirka. Sawirka 1 hoostiisa waxaa ku qoran 'macallimiinta qaba tababar fiican oo yar'. Fallaar ayaa ku xirta sawirka labaad oo tusaya fasal buux dhaafay oo ay arday badani u fadhiyaan safaf si isku dhow dhow. Macallin ayaa la arki karaa masaafada hore oo tilmaamaya sabuuradda wax ku qoran. Darbiyada fasalka iyo daaqaduhu waxay ku jiraa xaalad dayactir la'aan. Sawirka 2 hoostiisa waxaa ku qoran 'dhowr macallin oo aan si fiican u tababarnayn iyo fasallo aad u ballaaran'. Fallaar ayaa ayaa ku xirta sawirka saddexaad kaasoo tusaya haweeney taagan ardyada hortooda oo miisaskooda fadhiya. Kor ayay tilmaamaysaa wayna hadlaysaa. Dhabarkeeda ayay ardayda u jeedisay. Fasalka xaggiisa hore hal arday ayaa wuxuu sii eegayaa bannaanka daaqadda, arday kalana madaxiisa ayuu gacmihiisa saaray miiska dushiisa. Sawirka 3 hoostiisa waxa ku qoran 'arday helaya waxbarasho tayadeedu liidato'. Fallaar ayaa ku xirta sawirka afraad kaasoo tusaya saddex arday oo haysta gaballo waraaqo ah. Laba ka mid ah ardayda way qoslayaan waxana waraaqahooda ku qoran 90% iyo 100% mid kasta oo ka mid ah waraaqahooda. Ardayga saddexaad wuxuu u muuqdaa mid murugaysan wuuna ka yare fog yahay waxaana warqaddiisa ku qoran 20%. Sawirka 4 hoostiisa waxa ku qoran 'arday dugsiga iskaga hartay sababtoo waxba ma baranayaan'. Fallaar ayaa ku xirta sawirka shanaad taasoo tusaysa nin fadhiya looxa ciyaarta hortiisa oo saaran miis yar. Wiil xiran dharka dugsiga ayaa wuxuu haystaa waraaqo ay wax ku qoran yihiin isagoo u soo taagay xagga ninka. Ninku wuu ka sii jeedaa gacantiisa ayuuna kor u taagayaa. Wejigiisa caro ayaa ka muuqata. Kalmadda 'iyo' ayaa sawirka shanaad ku xirta sawirka lixaad ee ugu danbaysa taasoo tusaysa wadoo dheer oo buuro dul maraysa kana sii gudbaysa laba kelli/ilood ama laba webi oo leh buundo yar oo loox ka samaysan. Dhanka bidix ee fog waxa ah dugsi. Dhanka midig ee fog waa xaafad. Laba arday oo dharka dugsiga xiran ayaa soconaya/maraya waddada. Sawirka 6 hoostiisa waxa ku qoran 'dugsigu aad ayuu uga fog yahay guryaha ardayda'.]

## c) Xannibaadaha gaarka ah ee ardayga ka hor joogsada waxbarashada

### Da'da

Marka ay ardaydu waxbarashada bilaabaan xilli danbe, ama ay darajooyinka/fasalada ku noqdaan (dhacaan), waxay u badan tahay in ay dugsiga ka hari doonaan inta aysan dhamayn ka hor.



[Sharraxaadasawirka: waxa ka muuqda laba miis oo mid walba ay fadhiyaan saddex arday. Xagga dambe ee dhinaca bidix waxa fadhiya saddex gabdhood oo iska soo horjeeda, mid ayaa waxa ag taal usha lagu tukubo. Miiska dhinaca midig ee hore waxa fadhiya saddex wiil. Midka dhinaca bidix waa mid weyn wuxuuna u muuqdaa in uu ka weyn yahay ardayda kale ee fasalka. Gaarkiisa ayuu u fadhiyaa wuxuuna u muuqdaa mid murugaysan. Wiilasha kale way hadlayaan wayna wada shaqaynayaan.]

### Iska hor imaadka iyo masiibooyinka

Iska hor imaadyada (sida dagaalada sokeeye) iyo masiibooyinku (sida daadadka iyo dhul gariirada) waxay noqon karaan sabab weyn oo ardaydu ay dugsiyada uga maqan yihiin. Dugsiyada dhibaato ayaa soo gaari karta, way burburi karaan, ama qoysasku waxay u baahan yihiin in ay meel kale u guuraan oo aan dugsiyo lahayn. U safridda/aaddida iyo ka soo noqodka dugsigu waxay noqon kartaa mid aan ammaan ahayn ama aysan suuragal ahayn.



[Sharraxaadasawirka: dhinaca gacanta bidix ee sawirka, waxaa ka muuqda teendhooyin balbalaaran oo cadcad oo wareegsan oo isku xig xiga, midba ay mid kale ka dambayso.  Teendhada u horraysa haweeney ayaa taagan, iyadoo sabuuradda tilmaamaysa, waxa jira koox arday ah oo haweenayda kor u eegaya, oo dhulka fadhiya.  Teendhada waxaa goobta inteeda kale ka sooca deyr bir ah oo dheer. Waxa taagan saddex askari iyo taangi dhinaca gacanta midig ee deyrka.  Dhulka waxa yaala dhawr raso oo haraadi/firidho ah iyo qashin.]

## Hayaanka

Ardayda lagu khasbo in ay hayaamaan sababo la xirriira masiibooyin ama iska horimaadyo ka dhaca waddamadooda badanaa waxay ku dambeeyaan xeryo qaxooti ee waddamo kale halkaasoo helitaanka waxbarashadu ay xaddidnaan karto. Ardayda ku barakacay gudaha, isla waddamadooda gudahooda, badanaa xataa waxay haystaan fursado yar in ay helaan waxbarasho caadi ah, haddiiba ay jirto.



[Sharraxaadasawirka: Tusmada khariidada Africa. Xagga kore waa qof gaariga naafada ku jira/saaran oo leh raadadka taayirada oo ka dambeeya kuwaasoo tilmaamaya dhaqdhaqaaq. Bartanka waa haweeney gacanta haysa cunug oo raadkooduna ka danbeeyo oo tilmaamaya dhaqdhaqaaq, xagga hoosena waa qof u soconaya xagga hoose oo raadkoodu ka dambeeyo kaasoo tilmaamaya dhaqdhaqaaq. Dhamaan sawiradu waa sawir gacmeedyo.]

## Naafanimada

**Ardayda naafaada ah badanaa waa laga saaraa/reebaa.** Tani waxaa sabab u noqon kara dhaqamada iyo rumaysnaanta/aaminaadaha, dhismayaasha oo aan ahayn kuwo la geli karo iyo/ama agabyo/kheyraad iyo awood la’aan lagu taageero baahiyaha kala duwan ee ardayda.



[Sharraxaadasawirka: wiil ayaa wuxuu ku fadhiyaa gaariga naafada isagoo iskiis dhulka u eegaya. Waxa muuqda dhowr jaranjaro oo ka dambeeya kuwaasoo kor u aada albaabka fasalka. Albaabka waxa ka muuqata haweeney waxbaraysa.]

## Caafimaadka

Caafimaad xumada, ay sababto nafaqo xumo iyo cudurro, waxay ka dhigaan arday badan kuwo dugsiga ka maqan.  Caafimaad xumadu inta badan waa natiijo toos ah ee xannibaado kale, sida faqriga, iyo masiibooyinka iyo iska hor imaadyada.

## Jinsiga

Adduunka oo dhan weli waxaa jira gabdho badan oo dugsiga ka maqan marka loo barbardhigo wiilasha. Habdhaqamada taban (xun) iyo qaybo caadooyinka ah ayaa saameyn ku yeesha gabdhaha iyo gelitaankooda waxbarashada. Tusaale ahaan, guurka carruurnimada iyo uur qaadka xilli hore, waxay yareeyaan suurtagalnimada in ay gabdhuhu dugsiyada tagaan ama xaadiraan.



[Sharraxaadasawirka: Waa gabar dhalinyaro ah oo aan xirnayn dharka dugsiga, oo cunug dhabarkeeda ku sida. Waxay taagan tahay bannaanka dugsiga wayna soo eegaysaa. Waxay u muuqataa mid murugaysan. Waxa muuqda laba gabdhood oo dharka dugsiga xiran oo taagan dugsiga hortiisa waxay soo eegayaan iyada wayna hadlayaan.]

## Afka/luqadda

Luuqadda dugsiga wax looga barto waxay noqon kartaa xannibaad hadday ka duwan tahay luuqadda looga hadlo cunuga deegaankiisa (‘afka hooyo’). Ardaydani waxay la halgami karaan in ay wax bartaan ugu dambeyntana dugsiga way ka haraan




[Sharraxaadasawirka:  dhinaca bidix waxa fadhiyasaddex gabdhood oo iska soo hor jeeda iyagoo ku wareegsan miis ay buugaag furana hortooda yaalaan. Gabar ayaa waxay leedahay “su’aasha 2 way fududayd”, gabar kale waxay haysataa usha lagu tukubo. Gabadha saddexaad waxay eegaysaa macallinka oo taagan meel ku dhow. Macallinku wuxuu leeyahay “ma jirtaa cid caawimaad u baahan?” Dhinaca midig waxa fadhiya laba wiil oo miis fadhiya iyagoo isku leh “ma dhamaysay?”. Wiil kale ayaa gaarkiisa u fadhiya isagoo fekeraya “mimi hapana jua” (ma fahmin). Dhamaan kalmadaha kale ee ku qoran khaanadaha hadalka waa afsoomaali.]

## Qawmiyadda, diinta iyo dhaqanka

Qayb ka mid ardaydu dugsiga ayay ka maqnaan karaan hadday wajahaan takoor iyo in lagu orinyo/buuqo sabab la xirriirta qawmiaydooda ama diintooda. Qayb waalidiinta/daryeelayaashu ahi carruurtooda dugsiga ayay ka reebi karaan sababtoo ah ma aha mid soo dhoweeya caqiidada diiniga ah ee qoysaskooda ama waxay dareemaan in aan caqiidooyinkaan dugsiga laga aqbalin.

## Faqriga

Inta badan waddamada dunida faqrigu waa xannibaad halis ah taasoo ardayda dugsiga ka reebta. Meelaha danyarta guud ahaan waxaa jira dugsiyo yar/kooban oo haysta agabyo yar iyo macallimiin yar oo tababar yar. Arrimahani waxay sii biiriyaan/kordhiyaan in ardaydu dugsiga ka maqnaadaan. Qayb ka mid ah qoysaska ma awoodaan in ay carruurtooda dugsiyada u diraan waxaana suurtagal ah in lagu khasbo carruurta in ay shaqeeyaan halkay dugsiga ka aadi lahaayeen.




[Sharraxaadasawirka: dhanka midig ee hore ee sawirka, saddex wiil ayaa dhulka fadhiya, hortooda waxaa ah xayn kabo ah. Wiilashu kabaha ayay dhalaaliyaan. Wiilka dhinaca bidix wuxuu haystaa usha lagu tukubo oo hortiisa taal. Waa nin ku fadhiya gambar wiilka dhinaca midig xiga hortiisa, isagoo kor u haya kabihiisa si loogu dhalaaliyo. Gadaashooda waxa ka muqda dukaamo iyo dad gadaya adeegyada(raashin) guriga. Muuqaalka danbe waxaka muuqda dugsi.]

Dunida oo dhan, in kastoo siyaasaduhu yiraahdaan waxbarashadu waa bilaash, haddana waxaa jira kharashaad qarsoon, sida dharka dugsiga iyo buugaagta waxbarashada.

# 2. Maxay tahay sababta ay ardaydu dugsiga uga maqan yihiin Soomaaliya?

Waxaa jira tiro sababo ah oo kala duwan oo la xirriira sababta ay ardaydu dugsiyada u xaadirayn Soomaaliya. Sababaha soo socda ayaa lagu xusay cilmi baaris laga sameeyey waxbarashada loo dhan yahay bilowgii barnaamjika Aan u dhamaano (TOFI) ee 2020-2021:

- abaar;
- barakaca dadweynaha ee ay sababeen iska hor imaad, dagaal sokeeye iyo masiibooyin
- guurka xilli hore;
- habdhaqanada ku aaddan ardayda baahiyaha gaarka ah qaba, jinsiga, qawmiyadda;
- xanuun, naafanimo iyo adeegyada dhaqancelinta oo aan jirin;
- la qabsi maandooriye;
- ku noolaanshaha meel aad uga fog dugsiga;
- in lagu oriyey/buuqay;
- deegaanada oo aan ammaan ahayn ama aan dugsiga oo aan si nabad ah lagu safri/aadi Karin;
- caafimaad xumo;
- in ay xoolo dhaqato ka soo jeedaan ama kooxaha la yaso ee si kale oo aysan mudnayn loogu takooray caafimaadka iyo nidaamyada waxbarashada;
- in ay danyar yihiin;
- carruurta oo shaqaysa/la shaqaaleeyo;
- in ay agoon/rajo yihiin.

## a) Wax ka barasho dhacdooyin ku saabsan ardayda dugsiyada ka maqan

Akhri dhacdooyinka qeexaya arday kala duwan oo dugsiga ka maqan ee Soomaaliya. Ka feker:

- Waa maxay sababta uu ardaygu dugsiga uga maqan yahay?
- Maxay yihiin xannibaadaha jira ee cunugaas ka hor taagan waxbarashada?
- Sidee lagu xallin karaa xannibaadahan? Maxay yihiin xalalka suurtagalka ah?

**Salmo** waxay adeegsataa gaariga naafada. Waxay rabtaa in ay dugsiga deegaankeeda la dhigato saaxiibadeeda ay guriga ka wada yimaadeen. Dugsigu ma lahan meelo gaariga naafadu ka geli karo, markaasi ina adeerkeed oo aan shaqo hayn ayaa u raacay dugsiga si uu kor ugu qaado, Salmo jaranjarooyinka uuna u kexeeyo ilaa albaabka. Ina adeerkeed iminka shaqo ayuu helay intaas ka badana Salmo dugsiga uma sii raaci karo. Dugsigu wuxuu yiri Salmo dugsiga ma dhigan karto caawiye la'aan. Salmo wixii intaas ka danbeeyey guriga ayay iska joogtaa.

**Sahra** waa 12 sano jir, waxayna ka soo jeedaa bulshada barakacayaasha ee duleedka Muqdishu. Waxay la soo guurtay hooyadeed iyo walaalaheed, iyagoo ka soo cararay iska hor imaad ka dhacay tuuladooda dhowr sano ka hor. waxayna waxbarashada seegtay dhawr sano. Sahra iminka waxay xaalado isku raran ah kula nooshahay qoyska intiisa kale hoy barakacayaal oo ku meel gaar ah. Sahra waxaa laga caawiyey in la qoro barnaamij waxbarasho oo uu maalgeliyo urur aan dawli ahayn oo xerada dhexdeeda ku yaal, laakiin waxay la halgamaysaa in ay xoogga saarto waxayna dareentay in ay weyn tahay in ay waxbarato. Ugu danbayntii, Sahra dugsiga way ka hartay markaasi waxay hooyadeed ka caawin kartay in ay qoyaska lacag u soo shaqeyso.

**Tawfiiq** waxa ku dhacay naafanimo xagga aragga ah iyo dhibaatooyin xagga waxbarashada ah. Waalidiintiisa waxay dareemayeen ceebeyn Waxay ku noolaayeen meel dugsiga ka fog markaasi wuxuu qoyska ka caawin jirey in uu qudaar ku gado suuqa deegaanka weligiisna dugsi ma aadin.

**Aamina** wax ma akhriso waxayna dugsiga kaga hartay da'da 9 jirka. Waxay guursatay markay 14 jirsatay. Aamina qoyskeedu waa qoys aad danyar u ah waxayna ugu guuriyeen in ay qoyska wax uun lacag ah iyo amni ugu keento. Aamina weli waxay la nooshahay qoyskeeda.

**Faarax** waa wiil 10 sano jir ah oo ku nool Basra, koonfurta Soomaaliya. Qoyskiisu waxay leeyihiin lo'. Faaraxna wuxuu mas'uul ka yahay daajinta riyaha. Marka lagu jiro xilliga jiilaalka qoysku wuxuu u guuraa deegaanada la deriska ah iyagoo raadinaya biyo iyo baad/daaq. Faarax weligii dugsi ma aadin.

# 3. Waa maxay siyaasad?

Xannibaado badan ayaa ardayda ka reeba dugsiga. Laakiin, Soomaaliya, sida ay yihiin xaaladaha waddamo badan, waxbarashadu waa xuquuq ay leeyihiin ardayda oo dhan. Waa muhiim in lagu baraarugsanaado waxa ay yihiin siyaasadaha ka jira Soomaaliya kuwaasoo ilaaliya xuquuqda waxbarashada ee carruurta oo dhan.  Waxaynu siyaasadahani u adeegsan karnaa in aynu ugu qareeno xuquuqda carruurta dugsiyada ka maqan. Laakiin si siyaasadahaasi loogu adeegsado si waxtar leh waxaynu u baahanahay in aynu EEGNO waxa ay sheegayaan iyo FEKER ku saabsan sida ugu fiican ee aan u adeegsan karno.

## Siyaasaduhu waxay qaadan karaan qaabab badan

- Siyaasaddu waxay noqon kartaa xirmo **mabaadi' shaqo** ah oo loo dejiyay si loogu hago koox dad ah ama urur (tusaale ahaan, siyaasadda dugsiga ee maqnaanshaha macallinka ama xeerarka loogu talogalay kooxaha dhallinyarada)
- Siyaasaddu waxay noqon kartaa xirmo **istiraatiijado** ah kuwaasoo sharxaya qorshayaasha dawladdu sameyso si loo keeno wax uun qaab isbeddel ah (tusaale ahaan, siyaasadda ku saabsan waxbarashada loo dhan yahay ama kor u qaadidda aqoonta macallinka).
- Siyaasaddu waxay noqon kartaa **sharci** kaasoo haga nidaamka sharci ee dal (tusaale ahaan, sharci dadka ka ilaaliya in la takooro)

# What is a policy?






Image 1


Image 2



Rules for Parent's Group

- Members should always respect each other
- Members of the group should always arrive on time
- If a member is not able to make a meeting, they must send a message before the meeting to the secretary
- Each member will take a turn to provide tea for the other members of the group at our meetings

Image 3




[Sharraxaada muuqaalka: Bogga waxa ka muuqda saddex muuqaal oo midba mid ku xigo. Muuqaalka ugu horeeya waa bogga ugu horeeya ee dukuminti. Waa cadaan iyo cagaar. Dhinaca sare waxa ku yaal summada dawlada oo ay hoosteeda ku qoran tahay Dawlada Faderaalka ah ee Soomaaliya, oo ay hoosteeda ku qoran tahay, Siyaasada Qaranka ee Wasaaradda Waxbarashada, oo uu ka sii hooseeyo cinwaan kale oo ah: Waxbarashada Baahiyaha gaar ah ee Naafada iyo Waxbarashada loo wada dhan yahay, Diseember 2018. Muuqaalka ku xigga waa warqad cad. Warqada waxaa ku qoran xeerka hab-dhaqanka ee koox. Cinwaankan waxaa ka hooseeya qodobo. Qodobka ugu horeeya waxa uu leeyahay: Xubnuhu waa in ay is ixtiraamaan. Mida labaad waxa ay leedahay: Haddii qof tumi waayo durbaan, waa in uu xoghaynta fariin u diro ka inta uusan waxsameyn. Midka xiggta waxa ay leedahay: Xubnuhu waa in ay waqtiaga ku yimaadaan. Mida xigta waxa ay leedahay: xubin kasta waxa in uu shaah siiyaa xubnaha kale, usbuuc kasta. Dhinaca midig, waxa ka muuqda bogga hore ee dukumiinti leh midab buluug ah iyo mid cad. Dhinaca sare ee bogga waxa ku qoran summad ay hoosteeda ku qoran tahay Dawlada Faderaalka ah ee Soomaaliya (Soomaali iyo Ingiriis). Cinwaankaas hoostiisa waxa ku qoran Dastuurka ku meel gaarka ah oo uu ka sii hooseeyo cinwaan kale oo ah: Waxaa la qaatay Agoosto 1, 2012, Muqdisho, Soomaaliya.]

Siyaasaduhu waxay ku shaqayn karaan heerar kala duwan (tusaale ahaan, waxay hagi karaan dhaqangelinta dugsiyada ama waxay ku shaqayn karaan heer caalami si ay u hagaan waddamo kala duwan, sida Xeerka Qaramada Midoobey ee Xuquuqda Dadka Naafada ah)

- Siyaasaduhu waxay yeelan karaan yoolasha waqtiga dhow-, waqtiga dhexe-, ama waqtiga fog.
- Siyaasadaha aynu akhrino aalaaba taariikh ayay iyaga u leeyihiin—yaa ka qayb qaatay samaynta siyaasaddan? Ma jiro arrimo ay dadku isku khilaafeen sidee ayayse dadku isugu raaceen waxa ay siyaasadu sheegayso?
- Markaasi, marka aynu siyaasadda fiirino waxaynu mar kasta u baahanahay in aynu FIIRINO si taxadar lehna uga FEKERNO.

# 4. Istiraatiijiayadaha/xeeladaha iyo xalalka ku saabsan halka ay joogaan iyo aqoonsiga ardayda dugsiyada ka maqan

Marmarka qaarkood xataa haddii aynu oganahay sababta carruurtu dugsiyada uga maqan yihiin iyo noocyada xannibaadaha ay wajahaan, ma aynu ogin halka ay carruurta dugsiga ka maqan ee bulshooyinkeenu ay joogaan iyo xannibaadaha gaarka ah ee ay wajahayaan. Markaasi, waa muhiim in la helo habab lagu helayo halka ay joogaan lana aqoonsado carruurta dugsiga ka maqan ee bulshada. Markaa ka dib waxaynu ka shaqayn karnaa in aynu horumarino xalal si ay dugsiga u tagaan. Waxaynu adeegsan karnaa meeertada FIIRI, KA FEKER, SAMEE si tan loo sameeyo.

Halkan waxa ku jira xayn aalado wanaagsan ah iyo xirfado aynu adeegsan karno si aynu uga fekerno halka ay ku sugan yihiin ardayda dugsiga ka maqan, sababta ay dugsiga uga maqan yihiin iyo xalalka aynu adeegsan karno.

## Waraysiyo iyo dood kooxeedyo

Hab wanaagsan oo dadka bulshada dhexdeeda lagaga soo ururiyo macluumaad ku saabsan halka ay ku sugan yihiin carruurta dugsiga ka maqan iyo nooca xannibaadaha ay wajahayaan, waa in la sameeyo waraysiyo ama dood kooxeedyo. Xusuusnow in ay muhiim tahay in waraysiyada iyo dood kooxeedyada loo isticmaalo **su'aalo furan,** dadku waxay dareemaan nafis si ay si furan uga hadlaan waxay ogyihiin iyo waxa ay u malaynayaan.

## Xirfadaha dhegaysiga

Xirfadaha dhegaysiga oo wanaagsan aad ayay u muhiim ugu yihiin ururinta macluumaad ku saabsan waxa ay dadku ka ogyihiin carruurta dugsiga ka maqan, iyo halka aynu ka heli karno. Xirfadaha dhegaysiga oo wanaagsan waxay kaloo naga caawin karaan in aynu si fiican u fahamno xannibaadaha ay carruurta iyo qoysasku wajahayaan.



Ka qaybgalayaal dhaqangelinaya xirfadahooda dhegaysiga mar lagu jiray tababar lagu qabtay Garowe, Soomaaliya


[Sharraxaada muuqaalka. Sawirku wuxuu tusayaa laba nin oo iska soo horjeeda. Mid ayaa dhegaysanaya halka kan kale uu hadlayo]

## Indha indhayn (fiirfiirin)

Indha indhayntu waa qayb muhiim ah ee marxaladda 'FIIRI' ee meertada 'FIIRI-KA FEKER-SAMEE'.  Waxa jiri kara meelo bulshada dhexdeeda ah oo aynu ka indha indhayn karno ardayda dugsiyada ka maqan aynuna arki karno aysan dugsiga u xaadirayn (tusaale., suuqa xilliga maalinta ee dugsiga la jiro—indha indhaynta ardayda dugsiga ka maqan ee qudaarta gadaya).

## Khariidayn

Khariidayntu waxay kaloo caawin kartaa in la aqoonsado halka ay carruurta dugsiga ka maqani joogaan bulshada dhexdeeda iyo xannibaadaha ay la kulmayaan.  Khariidayntu waxay caawin kartaa in la abuuro sawirka bulshada iyo sida dhibaatadu u weyn tahay. Tani waxay caawin kartaa qorshaynta xalalka iyo ka feker ku saabsan yaa bulshada dhexdeeda ah oo gacan ka gaysan kara in la taageero in carruurta dugsiga ka maqani ay dugsiyada tagaan.



Tusaale khariidad la sameeyey, Livingstone, Zambia


[Sharraxaadasawirka: sawirku wuxuu tusayaa naqshad jidad toosan iyo kuw qalooca. Waxa ah goobooyin yar yar oo fara badan oo muujinaya meelaha laga heli karo guryaha, dukaamada iyo dugsiyada.]

# 5. Waa maxay ka gudubka heerarka waxbarashadu?

Ka gudubka heerarka waxbarashadu waa marka ay ardaydu **yimaadaan dugsiga** ama **ay ka baxaan**. Waa marka ugu horraysa ee ay dugsiga aadaan, ama ka gudbaan hal heer, fasal ama dugsi ka baxaan oo mid kale tagaan.


Ka gudubka heerarka waxbarashada siyaabo kala duwan ayuu u saameeyaa ardayda. Khibrado badan ee ka gudubka heerarka waxbarashada ee ardaydu waa mid togan (wanaagsan) laakiin marmarka qaarkood waa kuwo taban (xun), ardayduna waxay ku sii jiri karaan in ay dhibaatooyin wajahaan.

Qayb ardayda ahi dugsiga way ka haraan inta lagu jiro ama wax yar ka dib u kala gudubka, gaar ahaan hadday qabaan baahiyo gaar ah kuwaas oo aan waxba laga qaban intii lagu guda jiray hannaanka u kala gudubka.



[Sharraxaada sawirka: wiil xiran dharka dugsiga, oo sita boorso ayaa koraya jaranjarooyinka. Kalmadaha ‘Dugsi Sare’ ayaa ku qoran halka ugu sarraysa jaranjarooyinka.   Saddex carruur ah ayaa taagan halka ugu hoosaysa jaranjarooyinka.  Carruurta waxa ku jira wiil xiran dhar dhexda uga duuban/wareegsan oo kor u fiirinaya wiilka kale, gabar cunug ku sidda dhabarkeeda oo u muuqata mid murugaysan iyo wiil xiran okiyaalo madow, oo ul hasyta oo u jeeda jihada ka soo horjeeda.  Kalamadaha “Dugsi Hoose’ ayaa ku qoran halka ugu hoosaysa jaranajarooyinka.]

ka gudubka heerarka waxbarashada waxa ku jira/ka mid ah carruurta oo ka tagta guriga oo aadda dugsiga, ama u kala wareega dugsiga gudihiisa (tusaale ahaan, ka gudba fasalka 5-aad ee dugsiga hoose una gudba fasalka 6-aad ee dugsiga hoose) ama ka taga dugsi oo mid kale aada (tusaale ahaan, in uu ka gudbo dugsiga hoose uuna ku biiro dugsiga sare).  Ka gudubka heerarka waxbarashada waxay carruurtu kala kulmaan fursado iyo caqabado ku saabsan waxbarashadooda iyo horumarkooda. Ka wada qaybgalka maareynta ka gudubka heerarka waxbarashada waxay carruurta oo dhan ka caawisaa in ay ka faa’idaystaan isbeddellada ay la kulmeen.




[Sharraxaadasawirka: geeska dhinaca bidix ee kore, waa dhisme tilmaamaya ‘Dugsi Hoose’. Gabar yar oo ul wadata ayaa soconaysa waddada dhanka dugsiga hoose.  Dhanka midig ee halkan waa dhisme tilmaamaya ‘Dugsi Sare’.

Gabar ka weyn isla gabadhii ayaa maraysa waddada iyadoo ka timid dhanka dugsiga hoose una socota dhanka dugsiga sare.   Halka hoose waa dhisme tilmaamaya 'Jaamacad'. Haweeney dhallinyar oo ul cad wadata ayaa soconaysa waddada iyadoo ka timid dhanka dugsiga sare una socota dhanka jaamacadda.]

Soomaaliya dugsiyadu waxay la kulmaan soo noqnoqodka waqtiyo ay xirmaan oo ay keenaan iska hor imaad, abaar iyo cunto yaraan. Tani waxay arday badan ku keentaa in ay dugsiyada dib ugu soo noqdaan markay muddo ka maqnaayeen ka dib. Halka ay tahay mid wanaagsan in aan aragno dugsiyadii oo mar kale furmay, waxa jira caqabado badan oo haysta ardayda, qoysaskooda, dugsiyada iyo macallimiinta. Qaybo ka mid ah ardayda si toos ah ayaa loogu dallacsiiyaa heerka fasalka ku xiga iyadoo aan loo diyaarin sidii uu ula tacaali lahaa/lahayd heerka fasalka cusub. Qaadashada arday cusub oo badan waxay kaloo keeni kartaa xajmiga fasalka oo ballaarta arday badanina waxay la halagamaan in ay ka qayb qaataan ayna ka guul ka gaaraan xaaladda sidan ah.

# Waxa ay ardaydu ka yiraahdeen ka gudubka heerarka waxbarashada

Kuwani waa qaybo ka mid ah waxyaabaha ay ardaydu ka yiraahdeen khibradooda ku saabsan ka gudubka heerarka waxbarashada.

Ma heli karo jid loo maro dugsiga cusub.

Waxaan ka welwelayaa in aanan helin saaxiibo cusub ama aanan si firfirciin uga qayb gelin dhacdoovinka dugsiga.

Waalidkeyga in badan lagama qayb gelin dugsiga. Hadda waxa aan ahay fasal sare, hase yeeshee weli waxa aan doonayaa in waalidkey la hadlo macallimiinta marka aan dhib la kulmo.

Horey uma arag dugsigayga cusub ka hor maalintii ugu horeysay ee dugsiga. Waan cabsaday.

Waxaan ku wareersanahay jadwalka cusub. Meesha aan aadayo iyo goorta aan aadayo? Waxaa la ii sheegaa in aan daahay.

Qof kasta waxa ay la tahay in aan 'weynahay' oo aan maareyn karo dugsigayga cusub. Weli waa cabsanayaa oo waan wareeray.



Dugsigu waxa uu ku yaalaa xaafad kale, taas oo cabsi ah.

Waxa aan dhib kala kulmaa in aan qof xun ahay marka la eego macallinka, sababtoo ah ma fahmo wuxuu iga rabo inaan sameeyo.

Runtii waa arrin adag in loo gudbo heerka kale. Imtixaanku kuma haboona Baahidayda.

Macallimiintaydii dugsiga hore waxa ay qorsheeyeen sida ay iiga caawinayaan maadooyinka. Dugsigayga cusub ma yaqaan arrintaas. Qorshaha taageerada oo dhan waa in dib loo bilaabaa mar kale. Waxaan ka rajaynayaa macallimiintaydii hore qorshaha lagu daro.

Waalidkayga kama maqnaan karo maalinta oo dhan

Macallimiintu si kala duwan ayey wax u sameeyaan dugsiga. Waxa ay wax u dhigaan siyaabo kala duwan. ma qaban karo waxa ay naga filanayaan.


Waxaan doonaya in aan dhigto dugsiga xirfadaha. Ma garanayo dugsiga loo wada dhan yahay ee ardayda baahiyaha gaarka ah leh. Ma jirto cid dugsigayga dhigata oo garanaysa.

# 6. Ka wada qaybgalka ka gudubka heerarka waxbarashadu wuxuu ka bilowdaa guriga

**Waalidiinta iy qoysasku** mar walba waxay qayb muhiim ah ka yihiin waxbarashada carruurta**.** Qoyska, guriga iyo bulshadu weli waxay udub dhexaad u yihiin cunugga mar kasta oo uu/ay ugu kala gudbayo heerarka waxbarashada dhexdeeda.


U gudubka heerka dugsiga macneheedu ma aha dhamaadka waxbarashada guriga. Si loo xaqiijiyo in ka gudubka heerarka waxbarashadu yahay mid habsami ah loona wadadhan yahay waxaa muhiim ah in laga qaybgeliyo waalidiinta iyo daryeelayaasha.

Waalidiinta iyo qoysasku inta badan waa u qareemayaasha koowaad ee waxbarashada carruurtooda. Waxaa laga yaabaa in ay dugsiyada kala doordoortaan, u qareemaan in dugsiyadu aqoonsadaan ayna qaabilaan baahiyaha cunugga, xaqiijiyaan in cunuggoodu haysto dhamaan agabyada ay u baahan yihiin in si buuxda loogu daro, iyo in ay cunuggooda u diyaariyaan isbeddel. Waalidiinta iyo qoysasku sidoo kale waa dadka og wax badan oo ku saabsan taageerada cunuggoodu u baahan yahay. Dhamaan kuwani waa doorar muhiim ah ee ay waalidiinta iyo qoysasku ciayaaraan marka lagu jiro ka gudubka heerarka waxbarashada.




[Sharraxaadasawirka: waa koox dad ah oo kuraas ku soo ururay, bannaanka dhismaha dugsiga. Waxay isugu jiraan dad laga aqoonsan karo bulshada, guddiga ka qaybgalka dugsiga iyo maamulaha dugsiga. Haweeney ayaa taagan bartanka iyadoo dadka la hadlaysa. Haweeneyda waxa ku xiga nin gacanta haya wiil yar oo dharka dugsiga xiran oo haysta ul dheer. Dadka kuraasta ku fadhiyaa dhamaantood waxay si taxadar leh u dhegaysanayaan haweeneyda hadlaysa.]

**Qoyska, guriga iyo bulshadu udub dhexaad ayay u yihiin mar kasta oo ardaygu u kala gudbayo heerarka waxbarashada dhexdeeda.**



[Sharraxaadasawirka: sawirku wuxuu tusayaa qoys koox ah oo bartanka jooga iyo afar dhisme oo afarta gees ah, oo leh waddooyin iyo fallaaro isku xiraya dhismayaasha iyo qoyska. Qoyska waxaa ka mid ah gabar yar, gabar weyn iyo will weyn, nin weyn oo wata usha socodka, haweeney iyo nin.   Kalmadaha 'qoys' iyo 'guri' ayaa ka hooseeya kooxda qoyska.  Xagga sare ee bidix, waxa ah dhisme tilmaamaya 'xannaano'. Gabadha yar oo gacanta haysata gacanta gabadha weyn ayaa maraya waddada iyagoo u socda dhanka 'xannaanada'. Waxa sidoo kale muuqdafallaar qaloocsan oo xannaanada ka timaada una socota geeska midig ee kore halkaasoo uu yahay dhisme tilmaamaya 'dugsiga hoose'. Gabar ka weyn gabadha yar ah ayaa maraysa waddada iyadoo ka timid dhinaca qoyska kuna socota dhanka dugsiga hoose.  Waxa kale oo muuqda fallaar qaloocsan oo ka timaada dugsiga hoose oo aadda geeska midig ee hoose halkaasoo uu yahay dhisme tilmaamaya 'dugsiga sare'. Gabar ka weyn isla gabadhii ayaa maraysa waddada oo ka timid qoyska una socota dhanka dusgiga sare.  Ugu danbayn, waxaa ah fallaar qaloocsan oo u socota geeska bidix ee hoose halkaasoo uu yahay dhisme tilmaamaya 'jaamacad'. Haweeney yar ayaa maraysa wadda oo ka timid dhanka qoyska una socota dhanka jaamacadda.]

# a) Dugsiga ka hor

waxaa jira arrimo la xirriira nolosha carruurta ee guryahooda kuwaasoo saameeya joogitaankooda iyo ka qaybqaadashadooda waxbarashada maadaama ay u kala gudbaan guriga iyo dugsiga maalin walba.

Saddex arrimood oo ugu muhiimsani waa:

- hurdo,
- quraac
- shaqada guriga.

## Hurdada

Helitaanka hurdo ku filan waa u muhiim carruurta oo dhan. Daalku wuxuu saameyn ku yeeshaa waxbarashada iyo bedqabka. Wuxuu keeni karaa xoog saaris liidata iyo xusuus liidata fasalka gudihiisa. Waxay sidoo kale si taban (xun) saamayn ugu yeelan kartaa niyadda iyo isla shaqaynta jirka carruurta.



[Sharraxaada sawirka: waa laba miis oo ay mid walba fadhiyaan saddex carruur ah. Dhinaca bidix ee danbe waasaddex gabdhood oo wada fadhiya. Buuggaagtoodu way furan yihiin wayna hadlayaan; gabar ayaa haysata usha lagu tukubo.  Waxa muuqda xayn boorar ah oo ay wax ku qoran yihiin oo ku dhegan xagga dambe ee darbiga.  Miiska dhanka hore ee midig waxa fadhiyasaddex wiil. Wiilka dhanka bidix waxa uu haystaa okiyaale madow iyo ul cad. Wiilka dhanka midig ee fog wuu hurdaa isagoo madaxiisu miiska saaran yahay.]

## Quraacda

Sida hurda la'aanta oo kale, gaajadu waxay saameysaa xoog saarista iyo caafimaadka carruurta. Qyabo dugsiyada ahi waxay la shaqeeyaan ururada deegaanka iyo bulshada deegaanka si loo sameeyo naadiyaal quraac ama barnaamijyada quudinta dugsiga. Marmarka qaarkood waxay gacan ka helaan xubnaha bulshada ama ganacsiyada




[Sharraxaada sawirka: dhinaca bidix waaxayn gabdho ah oo xiran dharka dugsiga iyagoo fadhiya miis fasalka gudihiisa oo cunto cunaya. Xaggaas albaabka furan ee dhinaca midig waxa ka muuqda kooxwiilal ah oo bannaanka kursi dheer ku fadhiya oo cunto cunaya. Wiil ayaa ku fadhiay gaariga naafada nin ayaana siinaya cunto. Dhinaca fog ee bidix waxaa ah laba digsi oo waaweyn oo dabka saaran oo uumi ka soo baxayo. Haweeney ayaa digsiyada gadaalkooda joogta oo cuntada adeegsaysa. Carruur badan ayaa iyagu suxuunta cuntada soo qaadanaya. Waxa muuqda haweeney soconaysa oo saxan ballaaran wax ku sidda. Calaamad ayaa tilmaamaysa 'dugsi' dhinaca hore ee bidix ee sawirka. Goobtu waa mashquul].

## Shaqada guriga

Caawimada guriga gudihiisa iyo hareerihiisa waxay qayb muhiim ah ka noqon karaan barashada xirfado cusub iyo qaadista mas'uuliyadda. Waxay sidoo kale si taban (xun) u saameyn karaan waxbarashada iyagoo carruurta ka dhiga kuwo daallan, wasakh leh ama dugsiga ka soo daaha.



[Sharraxaada sawirka: gabar yar ayaa waxay nadiifinaysaa dhulka qol iyadoo baaldina agteeda yaal.  Waxa muuqda kuraas fadhi oo gabadha ka danbeeya iyo laba sawir oo darbiga ku dhegan, mid wuxuu tusaya afar qof (laba waaweyn iyo laba carruur ah) midna wuxuu tusayaa laba carruur ah.  Wiil ayaa maraya isagoo dhaafey gabadha dhulka nadiifinaysa. Wuxuu xiran yahay dharka dugsiga, boorso ayaana dhabarka u saaran. Gabadhu wiilka ayay fiirinaysaa. Waxay u muuqataa mid murugaysan.]

# 7. Istiraatiijyadaha/xeeladaha lagu taageerayo ka gudubka heerarka waxbarashada loo dhan yahay

Dugsiyadu sidoo kale waxay mas'uuliyad ku leeyihiin taageerada ka gudubka waxbarashada loo dhan yahay. Waxaa jira xeelado kala duwan oo uu dugsigu hirgelin karo si loogu taageero ka gudubka heerarka waxbarashada loo dhan yahay. Kuwaan waxaa ka mid ah waxyaabaha sida:

- dugsigu abuurka taageerada isku faca ee ardayda cusub oo dhan. Dugsigu waa in uu ku dhiirigeliyo ardayda in ay iscaawiyaan kuna abaalmariyo iscaawinta.
- Dugsigu waa in uu u abaabulo ardayda si ay u booqdaan fasaladooda ku xiga ama dugsiga ayna noqdaan kuwo aqoon u leh waxyaabaha ku hareeraysan, dadka iyo habraacyada inta aysan wareegin/guurin ka ka hor.
- Dugsigu waa in uu diyaariyaa siyaasad ka dhan ah ku orinta/buuqa (Geesgelinta), waana in uu xaqiinjiyaa in dadka qaangaarka ah ee shaqaynaya xilliyada quraacda iyo qadada loo sheego hadday jiraan cid cusub oo imanaysa.

Sidoo kale, waxaa jira xeelado gaar ah oo ay ka mid yihiin hawlgalinta waalidiinta/daryeelayaasha ardayda iyo qoysaska, tusaale ahaan:

**Booqasho guriga** ay sameeyaan macallimiinta ama xubnaha guddiga ka qaybgalka dugsiga. Tani waxay macallinka ka caawin kartaa in ogaado ardayga uuna ka caawiyo sidii wax looga qaban lahaa walaacyada ay qabaan waalidiintu/daryeelayaashu




[Sharraxaada sawirka: waa saddexa carruur ah oo bannaanka ku ciyaaraya. Laba wiil iyo gabar. Wiilka weyn ee dhinaca bidix wuxuu u muuqdaa in uu laadayo. Kubbadda cagta ayaa hortiisa ah. Wiil xiran funaanda jaalle ah ayaa dhinaca midigta ah wuxuuna u socdaa dhanka kubbada; wuxuu haystaa ul dheer. Gabadhu waxay fadhidaa dhnica bidix ee fog, iyadoo sacbinaysa oo dhiirigelinaysa wiilka. Gadaashooda waxa fadhiya nin iyo haweeney daawanaya oo qoslaya.]

Siinta **macluumaad, agabyada taageerada iyo wacyigelinta** eek u saabsan dugsiga si wax looga qabto walaacyada uu qoysku qabo looguna dhiirigeliyo in ay qayb firfircoon ka noqdaan hannaanka ka gudubka heerarka waxbarashada.




[Sharraxaada sawirka: waa saddex qof oo taagan oo isla hadlaya bannaanka. Haweeney ayaa waxay kuwa kale siinaysaa waraaqo jaalle ah. Agtooda waxa taagan nin boor jaalle ah oo ay ku qoran tahay ‘dugsi loo dhan yahay’ ku dhejinaya bannaanka dhismaha. Muuqaalka danbe nin kale ayaa wuxuu waraaqo jaalle ah siinayaa labo qof oo fadhiya oo hadlaya. Muuqaalka danbe waxa  ka muuqda ri’ iyo xayn guryaha xaafadda ah iyo nin iyo wiil wax beeraya].

Qabashada **xiisad wacyigelin** (ku casuumidda waalidiinta in ay booqdaan dugsiga) laga yaabee in ay qayb ka noqoto maalinta diiwaangelinta. Tani waxay gacan ka gaysan kartaa in waalidiinta iyo daryeelayaasha la baro dugsiga waxna laga qabto walaacyda ay qabaan laguna dhiirigeliyo in ay qayb firfircoon ka noqdaan hannaanka ka gudubka heerarka waxbarashada.




[Sharraxaada sawirka: dad badan ayaa ku soo ururay bannaanka, dhismaha dugsiga hortiisa. Dhinaca bidix waa haweeney fadhida miis ay dhinaca kaga qoran tahay calaamadda 'Diiwaangelin'. Waxa sidoo kale muuqda laba haween ah iyo laba carruur ah oo taagan miiska hortiisa. Muuqaalka danbe, ee dugsiga hortiisa, laba wiil ayaa miis u sii sida xagga fasalka. Dhinaca bidix ee miiska ka danbeeya, saddex wiil oo uu ku jiro mid usha lagu tukubo wata ayaa kubbada cagta ku ciyaaraya. Dhinaca midig, xayn dad ah ayaa ku urursan fadhiyo teendho weyn hoos yaal waxayna dhegaysanayaan haweeney hadlaysa.]

## a) Mabaadi'da muhiimka ah ee habsamida ka gudubka heerarka waxbarashada

- Dhamaan ardaydu waxay mudan yihiin ayna xaq u leeyihiin ka gudubka heerarka waxbarashada oo habsami ah
- Xirriirada wanaagsani waa muhiim: ka gudubka heerarka waxbarashada oo wax ku ool ahi wuxuu ku salaysan yahay is-aaminid iyo is-ixtirmaam wadajir ah oo ka dhexeeya cunugga, waalidka iyo xirfadlayaasha ka qayb qaadanaya oo dhan
- Arday kasta waa shakhsi: taageerada ka gudubka heerarka waxbarashadu waa in ay tahay mid debecsan oo lagu jaangooyay baahiyaha ardayga
- Isku dubaridka taageerada iyo xirriir wanaagsan oo ka dhexeeeya macallimiinta iyo hay'adaha waa lagama maarmaan.
- Jawiga/deeganka dugsigu wuxuu taageeraa xirriir furan, kalsooni leh oo daacad ah wuxuuna dhiirigeliyaa iskaashi/wada shaqayn
- Waqti iyo agabyo/kheyraad ku filan waa in la qoondeeyaa si loo xaqiijiyo aqballaadda, taageerada qiimayn hore iyo tilmaansiin (kuruud bixin) waa wax ku ool
- Ardayda waa in la dhegaysto, hase yeeshee waa yar yaryihiin aan loo dafirin, si baahiyahooda loo fahmo aragtiyahoodana loo tixgeliyo
- Qoysasku waa in ay ku jiraan/ka mid yihiin qorshaynta: waalidka/daryeelayaashu waa il muhiim ah ee macluumaadka iyo taageerada dugsiga.

# 8. Doorka ururada dadka naafada ee aqoonsiga ardayda dugsiga ka maqan iyo taageeridda ka gudubka heerarka waxbarashada

Ka gudubka heerarka waxbarashada loo dhan yahay wuxuu ka bilowdaa guriga iyo bulshada wuxuuna socdaa ilaa safarka lagu tegayo dugsiga, imaanshaha dugsiga iyo gelitaanka fasalka. Taageeridda ka gudubka heerarka waxbarashada loo dhan yahay waa masuuliyadda waalidka iyo daryeelayaasha iyo sidaa si la mid ah shaqaalaha dugsiga iyo macallimiinta

Ururada dadka naafada door muhiim ah ayay ku leeyihiin aqoonsiga ardayda dugsiga ka maqan iyo fududaynta ka gudubka heerarka waxbarashada loo dhan yahay. Doorkani wuxuu qaadan karaa qaabab kala duwan. Qayb waxyaabaha muhiimka ah ee ay samayn karaan waa:

A. **Adeegsiga siyaasadda si ay saamayn ugu yeelato go'aan ka gaarista isbeddelka**


B. **Raadinta iyo ururinta macluumaad si loo dhiso/xoojiyo caddaymaha isbeddelka**

C. **Fududeynta wada shaqeyn/iskaashi si loo dhiso wada shaqayn xooggan iyo shabakado isbeddel**

D. **Wacyigelin ku saabsan waxa uu yahay isbeddelka loo baahan yahay ee waxbarashada loo dhan yahay**

E. **Kormeeridda iyo taageeridda hannaannada isbeddel ee waxbarashada loo dhan yahay**

## A. Adeegsiga siyaasadda si ay saameyn ugu yeelato go'aan ka gaarista isbeddelka




[Sharraxaadasawirka: waa shan qof oo qol fadhiya. Darbiga waxa ku dhegan jadwalka taariikhda (calender). Dhinaca midig waa nin si fiican u labisan oo fadhiya miiska gadaashiisa oo haysta xayn waraaqo ah oo miiska saaran. kalmadaha 'Sarkaalka Waxbarashada Degmada' ayaa miiska ku qoran. Wuu dhegaysanayaa. Waxaa isaga ka soo horjeeda afar qof oo kuraas ku fadhiya. Ninka waxa ugu soo xigta haweeney si fiican u labisan oo wadata ul cad oo dheer. Jirka ayay dhaqdhaqaajinaysaa wax bayna ninka u sharxaysaa. Waxay haysataa waraaqo dawladeed oo rasmi ah ooy korka kaga taal calaamadda dawladdu. Waxa iyada ku xiga wiil hasyta ul cad iyo nin iyo haweeney. Way qoslayaan.]

## B. Raadinta iyo ururinta macluumaad si loo dhiso/xoojiyo caddaymaha isbeddelka




[Sharraxaadasawirka: nin leh hal lug, oo suud xiran oo isticmaalaya usha lagu tukubo ee naafada. Wuxuu taagan yahay meel ku dhow albaab guri. Albaabku wuu furan yahay. Haweeney ayaa taagan marinka albaabka furan iyadoo la hadlaysa ninka. Waxay xiran tahay dhar caadi ah. Jirka ayay dhaqdhaqaajinaysaa sunniyaheedana kor ayay u qaadday – sida iyadoo wax sharxaysa. Haweeneyda waxa ka danbeeya, xagga marinka albaabka furan gabar yar ayaa dhulka nadiifinaysa.]

## C. Fududeynta wada shaqeyn/iskaashi si loo dhiso wada shaqayn xooggan iyo shabakado isbeddel



[Sharraxaadasawirka: waa 9 qof oo si nus-wareeg ah ugu fadhiya kuraas dhaadheer fasal gudihiisa ay muuqaalka danbe ku leh saddex daaqadood. Daaqadaha dhexdooda waxaad ka arki kartaa dhismayaal u eg dhismayaal dugsi. Kooxda waxaa ku jira nin gaariga naafada ku fadhiya, nin waayeel ah oo wata usha socodka iyo gabar xiran dharka dugsiga oo lug go'an oo wadata usha lagu tukubo, waxaa kaloo ku jira saddex dumar ah oo kale iyo nin iyo wiil yar oo wata okiyaale madow ul dheerna haysta. Kooxdu waxay dhegaysanayaan haweeney hadlaysa, wejiyadooda waxaa ka muuqda in ay ka hadlayaan arrimo dhab ah oo walaac leh.]

## D. Wacyigelin ku saabsan waxa uu yahay isbeddelka loo baahan yahay ee waxbarashada loo dhan yahay



[Sharraxaada sawirka: koox dad ah oo ka kooban sideed qof ayaa isugu soo ururay bannaanka. Qayb ka mid ah dadka way fadhiyaan qaybna way taagan yihiin. Haweeney fadhida ayaa haysata usha ay isticmaalaan dadka arraga la'. Haweeney kale oo taagan ayaa gacmaheeda tilmaamo ku bixinaysa iyadoo nin la xirriiraysa. Dhamaan dadku waxay fiirinayaan oo dhagaysanayaan haweeney si fiican u labisan oo taagan, way qoslaysaa wayna hadlaysaa iyadoo cod baahiye isticmaalaysa. Haweeneydu waxay gacanteeda ku hasyataa gabar yar oo dhar guduudan iyo kabo saandal ah xiran oo boorso sidata. Gabadhu kor ayeay haweenyeda u fiirinaysaa wayna qoslaysaa. Ninka suutka xiran ee halka lug leh wuxuu fadhiyaa kursi ku xiga haweeneyda cod baahiyaha haysata. Usha lagu tukubo ayaa dhulka taal. Muuqaalka dambe waa xayn dukaamo ah, masjid, dad soconaya iyo dad dhulka fadhiya oo soo bandhigaya rasooyin/xirmooyin wax soo saar ah.]

## E. Kormeeridda iyo taageeridda hannaanka isbeddel ee waxbarashada loo dhan yahay




[Sharraxaadasawirka: waa dad badan, rag, dumar iyo carruur oo ka wada shaqaynaya dhismaha dugsiga hortiisa. Nin ayaa wuxuu riixayaa gaari gacan ay dhagaxyo waaweyni saaran yihiin. Qeyb dadka ahi waxay dhigayaan dhagxaanta si ay u sameeyaan cirifyada waddooyinka dugsiga aada/taga. Wiil saaran gaariga naafada ayaa wuxuu tilmaamayaa halka dhagaxyada la dhigayo. Muuqaalka dambe laba haween ah oo si fiican u labisan ayaa hadlaya. Wiil wata ul cad ayaa ag maraya haweeney sida santuuq dhalooyin biyo ah.]